

# Sida Loo Samaynayo Shaybaadhka COVID-19 ee Lucira Check It

**TALLAABADA 1AAD.** Ka helitaanka shaybaadhka goobta shaybaadka.

**TALLAABADA 2AAD.** Akhri dhamaan tilmaamaha la xidhiidha shaybaadhka.

**TALLAABADA 3AAD.** Isku baadhida meel aan ahayn goobta shaybaadhka iyo sugitaanka 30 daqiiqo natijjada.

**TALLAABADA 4AAD.** Ka tabi natijjada [healthvermont.gov/reportresults](https://www.healthvermont.gov/reportresults) oo buuxi foomka gaaban. Waxaa muhiim ah inaad ka warbixiso natijjada shaybaadhkaaga. Jawaabtaadu waa sir.



**TALLAABADA 5AAD.** Hadii cadaynta natijjada shaybaadhkaaga loo baahan yahay, fariin qoraal ah oo ah 'LUCI' u dir 44544 oo raac tilmaamaha dheeraadka ah.



Si aad u hesho tilmaamo imtixaan oo tarjuman iyo fiidyawyo tilmaameed, booqo <https://www.healthvermont.gov/covid-19/testing#testdetails>  
[QR CODE]



Shaybaadhka COVID-19 ee Lucira Check It waxa la socda **baatariyada 2 AA**. Fadlan isku day inaad si kale u adeegsato ama dib loo warshadeeyo baatariyadan sida ay dhigayaan tilmaamaha maamulka maaraynta qashinka adkhaa ee deegaanka kadib isticmaalka.

# Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo (FAQs)

**Waa shaybaadh nooce ah Shaybaadhka COVID-19 ee Lucira Check It?**  
LAMP waxaa weeye nooc ka mid ah tarminta molikiyuulaar oo loo isticmaalo shaybaadhka Lucira. Sida shaybaadhka PCR oo kale, shaybaadhka Lucira waxa uu tarmiyaa hide sidaha fayraska SARS-CoV-2 inta uu shaybaadhku socdo. Tarminta ka dhacda PCR iyo shaybaadhka Lucira waxay u sahashaa shaybaadhada molikiyuulaarka inay ogaadaan natijada laga heley. Sidaas darteed, saxnaanta Lucira waxaa la barbar dhigi karaa mid ka mid ah kuwa ugu nuglaanshiyaha badan shaybaadhada PCR.

**Waa sidee Shaybaadhka COVID-19 ee Lucira Check It marka loo eego shaybaadhka PCR?**

Shaybaadhada molikiyuulaarka, sida shaybaadhka PCR iyo Lucira, waxay tarmiyaan marar badan hide sidaha fayraska inta shaybaadhku socdo iyadoo la adeegsanayo hannaan loo yaqaan tarmin (amplification). Tani waxay u sahashaa shaybaahada molikiyuulaarka inay ogaadaan hadii qof uu qabo fayraska SARS-CoV-2 marka xadi yar oo fayras ahi uu ku jiro.

**Waa maxay LUCI Pass?**

LUCI Pass waxaa weeye alaab Lucira leedahay si laguugu fududeeyo inaad hesho natijo shaybaadh oo dhijitaal ah oo bilaash ah oo Lucira xaqijiisay oo taleefankaaga kuugu soo dhacda. Kadib marka la galo shaybaadhkeena, waxaad kaliya farriin qoraal ah ugu diraysaa "LUCI" lambarka 44544 ama tag luci.lucirahealth.com adiga oo isticmaalaya taleefankaaga si aad u gasho dagalka LUCI ee ammaanka ah, oo kadibna raac tilmaamo dhawr ah oo aad ku gudbinayso natijada.

**Maxay noqonaysaa hadii natijada shaybaadhkayga laga helo?**

Hadii shaybaadhkaaga laga helo, waxa aad kaga warbixisa linkiga ku qoran dhanka kale ee kaadhkan. Wixii tilmaamo dheeraad ah, fadlan booqo [healthvermont.gov/covid19positive](http://healthvermont.gov/covid19positive)

**Si aad macluumaad badan uga ogaato shaybaadhka COVID-19 ee Lucira, tag checkit.lucirahealth.com**